IRIS

Include, Respect, I Self-Direct

# Waraaqaha Gacanqabsiga Akhristaha

## Waxaa Loo Naqshadeeyey in Lagu Caawiyo Nolosha Dadka Lagu Taageero Baahidooda

Wisconsin Department of Health Services

P-01008SO (08/2021)

## Barnaamijka IRIS – Include, Respect, I Self-Direct

Ku soo dhawoow barnaamijka Include, Respect, I Self-Direct (IRIS). IRIS waxaa maalgeliya ceymiska caafimaadka Medicaid oo waa daryeelka mustaqbalka fog oo waxaa bixiya Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin Department of Health Services. Barnaamijka IRIS waxaa laga helayaa deegaan kasta oo ay ka shaqeeyaan xafiiska daryeelka qoyska ama Family Care. Barnaamijka IRIS dadka ayaa xukuma lacagta miisaaniyadda u ah, oo macnaheedu waa in ay kala dooran karaan alaab, taageero iyo adeegyo ay wixii ay ku gaari karaan yoolalkooda daryeelka mustaqbalka fog. Waxa kale oo ay dadku xukumaan qofka ay shaqaaleynayaan, taasoo macnaheedu yahay in ay qoranayaan oo ay maareynayaan shaqaalaha ku caawinaya in ay gaaraan yoolalkooda daryeelka mustaqbalka fog. Dadka ku jira barnaamijka IRIS waxay dooran karaan xafiis ay ka helaan shaqaalaha. Lacagta IRIS waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo adeegyo aysan dadka u qaban karin qoyska iyo asxaabta. Markaad diyaarsato caawimaadda laga helo dadka kale waxaad ku sii xoojineysaa intii aad iska beddeli lahayd. Lacagta IRIS waxaa loo isticmaalaa in lagu helo caawimaa hadba sidii loogu baahdo.

IRIS wuxuu ku saleysan yahay Fikrado ah Go'aan Shakhsiyeed:

- Inaad xor u tahay go'aanka sida aad rabto inaad u noolaato
- Inaad xukunto miisaaniyadda lacag gaar ah
- Inaad adigu sida kuugu muhiimsan u sameysato wixii taageero ah
- Masuuliyad ah inaad si macquul ah u isticmaasho lacagta dowladda
- Xaqiijinta hoggaamin muhiim ah oo aad naftaada ugu hadleyo

## Qasdiga Waraaqahan Gacanqabsiga ah

Waraaqahan gacanqabsiga ah waxaa laguugu sharxayaa Barnaamijka IRIS iyo xilka ku saaran markaad barnaamijka ku jirto. Waxa kale oo uu kuu sharxayaa dadka kuu diyaarsan ee ku caawinaya ee aad ka heleyso fikrado iyo talo aad ku sameysato qorshahaaga IRIS. Waxa uu sidoo kale kuu faahfaahinayaa masuuliyaddaada IRIS.

Adigaa noloshaada khabiir isu ah. Qof kasta adigaa ka badiya wixii muhiim kuu ah iyo wixii taageero ah oo aad u baahan tahay. IRIS waa barnaamij kugu caawinayaa inaad gaarto arrimaha yoolalkaaga si aad ugu noolaato sidii aad rabto.

In lagu jiro IRIS macnaheedu ma aha in aad adigu naftaada wax kasta u sameysaneyso – balse dad kale ayaa kugu caawinaya danahaaga. Dadka masuulka laga yahay ama leh wakiillo waa ay soo geli karaan IRIS.

## Tusmada Qoraalka


Barnaamijka IRIS – Include, Respect, I Self-Direct ... 1
Qasdiga Waraaqahan Gacanqabsiga ah ... 1
Macnaha Nolosha aad Adigu Hageyso ... 4
Caawimaad ayaad ka heleysaa IRIS ... 4
Xafiiska Xiriirka ee IRIS Call Center: ... 4
Xafiisyada La-taliyeyaasha IRIS ... 5
La-taliyeyaasha IRIS ... 5
Doorashada La-taliyehaada IRIS ... 5
Kulanka Idiinku Horreeya ... 6
Wakiillada Shaqaalaha Barnaamijka IRIS ... 6
Sameynta Qorshahaaga Taageerada Adeegga IRIS ... 7
Qorsheyaasha Taageerada iyo Adeegyada waa Muhiim ... 7
Miisaaniyadda IRIS ee Bil Kasta ... 8
Marka Lacag Dheeraad ah Loogu Baahdo Qorshahaaga ... 8
Bilaabidda Qorshahayga ... 9
Beddelaadda Qorshahaaga ... 10
Marka Taageero Degdeg ah Loo Baahan Yahay ... 10
Waxayaabaha IRIS, Taageerada iyo Adeegyada kuu Diyaarsan ... 11
Daryeelka IRIS ee Shakhsiga ah ... 12
Waxyaabaha, Taageerada iyo Adeegyada AYSAN kaa Bixineyn IRIS ... 12
Dhammeystiridda Qorshehaaga Sida La-taliyehaaga IRIS Kuu Caawin Karo ... 12
Jadwalka IRIS ... 13
ARRIN MUHIIM AH: Qorshaha Inuu Kuu Shaqeeyo ... 13
Helidda Shaqaalaha ... 14
Fursadaha Helidda Shaqaale ama Caawiyeyaal ... 14
Waxyaabaha la Tixgeliyo Markaad Shaqaale Qoraneyso ... 15
Sameynta Masuuliyadda Shaqada ... 15
Helidda Shaqaale Fiican ... 15
Wareysiga Dadka Shaqada Soo Codsaday ... 16
Soo-hubinta Raadraacyada ... 18
Dhammeystirka Daryeelaha iyo Soo-hubinta Danbiyadii Hore ... 19

Kama-dambeys Bixinta Shaqada ... 19
Manaafacaadka Kale ee Shaqaalahaaga ... 20
Go'aanka haddii Qorshahaagu kuu Shaqeynayo ... 20
Dibu-eegista Sannadka ... 20
Badqabidda iyo Caafimaadka ... 21
Waajibaadka kaa saaran IRIS ... 21
Waajibaadkaaga Shaqa-bixiye Markaad Qoroto Shaqaalahaaga ... 22
Lacagtaad Medicaid Qeybtaada Bil Kasta Bixineyso ... 22
Soo-diridda Cabsho iyo Dacwo ... 24
Beddelashada la aado Xafiis Wakiil Shaqaale oo Cusub oo ah La-taliyaha IRIS ama Ka-bixidda Barnaamijka IRIS ... 25
Jawaabaha Su'aalahaaga ama Macluumaad Dheeraad ah ... 25
EREY-BIXINTA QORAALKA ... 26

## Macnaha Nolosha aad Adigu Hageyso



Waxyaabo badan iyo sidaad rabto ayaad go'aankaaga u dooran kartaa. Adigaa wax kala dooranaya:

- Alaabo, taageero iyo adeegyo wixii aad u baahato.
- Markaad arabto inaad hesho alaabo, taageero iyo adeegyo.
- Qofka aad ka heleyso alaabta, taageerada iyo adeegyada.
- Meesha aad ka arabto inaad ka hesho alaabta, taageerada iyo adeegyada.
- Sida aad si xilkasnimo leh IRIS ugu isticmaasho missaaniyadda bil kasta.

## Caawimaadda aad ka heleyso IRIS



### Xafiiska Xiriirka ee IRIS Call Center:

Ka dib markaad isku qorto barnaamijka ayaad la xiriiri kartaa IRIS Call Center (Xafiiska Xiriirka) ee Department of Health Services' (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) Call Center. Xafiiska IRIS Call Center wuxuu ka jawaabayaa su'aalaha aad weydiiso.

*La soo xiriir xafiiska IRIS Call Center adigoo lacag la'aan ku soo garaacaya 1-888-515-4747 ama farriin ugu soo dir IRIS@wpsic.com.*

## Xafiisyada La-taliyeyaasha IRIS

Department of Health Services (Waaxda adeegyada caafimaadka) waxay la xiriirtaa xafiisyada la-taliyeyaasha IRIS iyagoo dusha kala soconaya hawlaha taageerda la-taliyeyaasha deegaankaaga ee IRIS. Xafiisyadaas waxay isku-duwaan diiwaangelinta barnaamijka, wacyigelinta dadweynaha, qorista hawlaha socda iyo in ay barnaamijka ka saaraan marka dad laga bixinayo. Xafiisyada la-taliyeyaasha waxay maareeyaan tayada barnaamijka oo dhan iyagoo hawsha ogaanaya. Ka dib marka ay dadku sameystaan qorshe ay la-taliyeyaashu ku caawiyaan, la-taliyaha xafiiska IRIS ayaa siinaya oggolaanshaha marka laga soo baxo shuruudaha la iska rabo. Kharashaadka shaqada ma aha kuwa laga rabo lacagta la siiyo dadka.

### La-taliyeyaasha IRIS

Qof kasta oo ku jira barnaamijka IRIS waxa uu leeyahay la-taliye ka socda IRIS. La-taliyeyaashu waxay qiimeeyaan madaxbannaannida, wax kala-doorashada, xorriyadda iyo waajibaadka IRIS. La-taliyeyaashu waxay aqoon u leeyihiin adeegyada deegaankaaga. La-taliyeyaashu waxay kugu caawinayaan sameynta qorshahaaga.

La-taliyehaagu waa shuruud in uu kula kulmo dhowr jeer sannad kasta. Waxaad codsan kartaa kulammo badan haddii aad uga baahato caawimaad dheeraad ah. Waxa kale oo aad ka codsan kartaa goorta iyo meesha aad kula kulmeyso.



La-taliyehaagu:

- Wuxuu kaa dhageysanayaa waxa aad naftaada u rabto in aad hesho.
- Wuxuu kugu caawinayaa inaad fahamto sidaad ku gaareyso yoolalkaaga.
- Wuxuu kugu caawinayaa naqshadeynta qorshe ku fiican lacagtaada.
- Wuxuu kaa hubinayaa in ay sax yihiin waraaqaha lagaa rabo.
- Wuxuu gacan kaa siinayaa cusbooneysiinta qorshehaaga.
- Wuxuu kugu caawinayaa helidda dad kuu shaqeeya, kuwa adeegga iyo waxyaabo kale .
- Wuxuu gacan ka geysanayaa dhammeystirka xafiiska shaqaaleynta iyo shaqaalaha iyo gudbinta waraaqaha wakiilka maamulka miisaaniyadda.
- Wuxuu kugu caawinayaa meelo aad ka heleyso qalab ama waxyaabo kale.
- Wuxuu kugu caawinayaa sahaminta fursado ah shaqooyin.
- Wuxuu gacan ka geysanayaa sameynta qorshe kale oo badqabid kuu ah.
- Wuxuu cabbirayaa sida fiican ee uu qorshehaagu u shaqeynayo.
- Wuxuu kugu caawinayaa fahamka masuuliyaddaada si aad xaq ugu sii yeelato barnaamijyada Medicaid iyo IRIS.

### Doorashada La-taliyehaada IRIS

Xafiiska la-taliyaha IRIS ee aad doorato ayaa kuu soo diraya macluumaad ku saabsan la-taliyeyaasha aad ka heli karto deegaankaaga. Adiga ayaa la xiriiri kara la-taliyeyaasha ka hor

intaadan go'aan ka gaarin. Ka hor intaadan go'aan ka gaarin, waxaad la-taliyehaaga weydiin kartaa:

- Tirada dadka kale ee ay u shaqeeyaan ee ku jirta IRIS.
- Waxa ay ka ogyihiiin adeegyada bulshada aad la nooshahay.
- Inta ay le'eg tahay waaya-aragnimada ay ka haystaan dadka adiga kula midka ah (haddii ay adiga muhiim kuu tahay helidda la-taliye fahmaya dhaqankaaga, naafannimada, iwm.).
- Maalmahee iyo wakhtiyadee ayaad heli kartaa si aad ula kulanto.

La-taliyaha aad doorato ayaa kula soo xiriiraya si aad u kulantaan. Haddii aad dooneyso inaad iska beddesho la-taliyaha, la xiriir oo caawimaad weydiiso xafiiska la-taliyeyaasha ee IRIS.

### Kulanka Idiinku Horreeya

Kulanka idiinku horeeya, la-taliyehaaga waa in aad is barataan oo waa qof kaa dhageysan doonaa waxa kuugu muhiimsan.

La-taliyehaaga waxa kale oo uu kuu sharxayaa waxyaabaha aad uga baahan tahay inaad ka ogaato IRIS, sida:

- Sida aad u sameysaneyso qorshaha IRIS ayaa waxaa lagugu caawinayaa gaarista yoolalkaaga daryeelka ee mustaqbalka fog.
- Sida ay u shaqeyneyso miisaaniyaddaada IRIS iyo sida aad u dooraneyso wakiilka xafiiska shaqaaleynta ee IRIS.
- Fursadahaaga iyo masuuliyaddaada barnaamijka IRIS.
- Sida loola soo xiriiro xarunta IRIS Call Center iyo xafiiska la-taliyehaaga ee IRIS.
- Sida loo sameysto cababasho haddii aadan wax ku qanacsaneyn.

## Wakiillada Shaqaalaha Barnaamijka IRIS

Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin Department of Health Services waxay la xiriirtaa wakiillada xafiiska shaqa-bixiyaha ee IRIS. Wakiillada maamulka shaqaalaha waa in ay si sax ah isaga hubiyaan maareynta xisaabaha canshuurta shaqa-bixiyaha iyo shaqaalaha kuwa daryeelka kuu sameynaya ee aad adigu shaqaaleysato. Wakiillada maamulka shaqaalaha waxa ay sidoo kale maareeyaan xisaabaad kale, oo waxay ururiyaan oo ay hayaan kharashaadka baxaya. Kharashaadka shaqada ma aha kuwa laga rabo lacagta IRIS.

Marka uu xafiiska la-taliyaha IRIS saxiixo waraaqaha qorshahaaga diyaarsan ee IRIS, waxaa koobbi loo gudbinayaa wakiilkaaga xafiiska shaqada. Qorshaha waxaa ku jira macluumaadk ku saabsan adeegyada la doortay, kharashaadka la bixinayo, qofka la siinayo iyo inta la siinayo. Wakiilka maamulka shaqaalaha:

- Ayaa gebi ahaan kuu buuxinaya hawlaha shaqa-bixiyaha iyo shaqaalha, sida baarista danbiyo waaweyn in ay soo galeen ama aysan soo gelin.

- Ayaa uruurinaya oo xisaabinaya kharashkaaga Caafimaadka ee bil kasta, haddii adiga lagaa rabo in aad wax ka bixiso kharashkaas, oo waxaa laguu soo dirayaa liiska kharashka aad bixiso bil kasta.
- Ayaa gacan ka geysanaya xaqiijinta aqoonta shaqaalaha oo adigana kuu sameyn doona waraaqaha heshiiska shaqaalaha.
- Kaa diraya kharash-bixinta aad u oggolaato xafiiska ama meelaha kale ee ku qoran qorshahaaga, ee kuu adeega, ku caawiya ama hawl kuu qabta. Sharciyada barnaamijkan waxaa shuruud u ah in jeegagga la dirayo lagu qoro xafiiska ama meelaha hawsha kuu qabta si aan lacag-celin laguugu sameyn haddii aad adigu toos u bixin lahayd.
- Wuxuu kuu noqonayaa wakiilkaaga shaqa-bixiyaha iyagoo buuxinaya saacadaha shaqada dadka kuu shaqeeya markay jiraan dad toos kuugu shaqeeya (eeg bogga 15 oo ah macluumaadka shaqaalaha).
- Wuxuu kuula soo xiriiri doonaa wakiilkaaga la-taliyaha xafiiska IRIS haddii aad ka codsato in lagaa bixiyo wax aan qorshahaaga ku qorneyn.
- Wuxuu kuu soo dirayaa warbixinta kharashka laga bixiyey miisaaniyadda.
- Wuxuu isku xirayaa xafiiska la-taliyahaaga IRIS iyo Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaad).



*Wakiilkaaga shaqaalaha kala xiriir maclumaadka gaarka ah ee Ceymiska Magdhowga Shaqaalaha, shaqa la'aanta, go'aamintа xaaladda shaqaalaha, bixinta waxyaabaha aan ahayn mushaar muddeysan, iyo kharashaadka Caafimaadka ee lagaa rabo.*

## Sameynta Qorshahaaga Taageerada Adeegga IRIS

### Qorsheyaasha Taageerada iyo Adeegyada waa Muhiim

Dadka ku jira IRIS oo dhan waxay haystaan qorshe taageero iyo addeg. Qorshehaagu waa inuu ku saleysan yahay yoolalkaaga daryeelka mustaqbalka fog iyo sida aad ku gaareyso. Qorshehaagu waa in ay ku qoran yihiin:

- Alaabo, taageero iyo adeegyada aad doorato.
- Dadka ama xafiisyada aad u xulato alaabada, taageerada iyo adeegyada aad doorato.

- Caddadka lacagta qorshahaaga ee aad ku isticmaali doonto wax kasta.
- Alaabo, taageero iyo adeegyada aad bil kasta u baahato.

Markaad qorshe sameysato, ka fekerto waxa aad ku ambaqaadeyso ama ku hagaajineyso tayada noloshaada, sida:

- Waxyaabaha adiga kuugu muhiimsan.
- Hawlaha iyo adeegyada aad u isticmaali karto.
- Alaabada, adeegyada iyo hawlaha aad u baahan tahay mar ama dhowr jeer sannadkiiba.
- Tirada shaqaalaha aad u baahan tahay iyo nooca adeegga laguu qaban doono.
- Dantaada ah shaqa-bixiyaha shaqaalaha ama isticmaalidda xafiis kuu qora shaqaale (eeg bogga 15 wixii ah macluumaadka iyo habka shaqaalaha).
- Qorshehaaga labaad ee degdegga ah, sida qofka ku caawinaya marka qofka uusan joogin qofka kiiskaaga haya.
- Sida aad ku ogaaneyso marka qorshahaagu kuu shaqeynayo.

### Miisaaniyadda IRIS ee Bil Kasta

Waa wax ku xiran baahidaada, laakiin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) ayaa qiyaaseysa qiimaha kharashka adeegyada aad u baahan tahay. Markaad gasho barnaamijka IRIS, waxaa laguu sheegayaa caddadka qiyaasta miisaaniyadda. Qiyaastan waa caddadka lacagta aad ku kharash gareyneyso daryeelka mustaqbalka fog daryeelkaaga, hawlhaaga iyo adeegyada kuugu qoran qorshaha laguu oggolaaday. Marka taageerada iyo adeeggaaga IRIS, kharashka guud ee lagu maalgelinayo qorshahaaga waxaa la yiraahdaa miisaaniyadd IRIS.

Miisaaniyadda wax baa laga beddeli karaa haddii loo baahdo (eeg qeybta soo socota). Haddii caafimaadkaaga ama awooddaadu is beddesho oo uusan qorshahaagu ku caawin karin, miisaaniyadda waa in la beddelo.

### Marka Lacag Dheeraad ah Loogu Baahdo Qorshahaaga

Miisaaniyaddaada IRIS waxay ku baxaysaa kharashka hawlahaaga, taageerada iyo adeegyada kuugu qoran qorshahaaga. Miisaaniyadda waa wax la leexleexin karo. Bilaha qaarkood in badan ama in yar ayaad ka isticmaali kartaa, balse waa in adeegyada aad rabto ay kuugu qoran yihiin qorshahaaha. Waxa kale oo aad beddeli kartaa lacagta u qorsheysan adeegyada kuugu qoran qorshaha. Waxaad meel dhigan kartaa lacag aad wax ku soo iibsato ilaa iyo 12 bilood oo mustaqbalka ah, marka alaabo, taageero iyo adeegyo ay kuugu qoran yihiin qorshahaaga.

IRIS wuxuu leeyahay habraac aad ku hubsaneyso oo miisaaniyaddu ay ku jirto alaabada aad soo iibsaneyso, taageerada iyo adeegyada. Haddii aad isku deyday inaad sameysato qorshe ku jira miisaaniyaddaada IRIS balse aad ogaato inuusan kugu filneyn, markaas la-taliyehaaga IRIS ayaa kuu diyaarinaya kuuna gudbinaya codsi ah lacag dheeraad ah Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) si laguugu soo oggolaado.

Waxa kale oo jiri kara marar aad u baahaneyso inaad hesho adeeg wax ama hal mar ah, sida guriga ama qalab aad iska beddesho, kuwaas oo ka mid ah waxyaabaha ay bixinayaan IRIS balse miiisaaniyadda ayaa kugu yaraan karta. Xaaladahaas oo kale, la-taliyehaaga IRIS ayaa diyaarinaya kuuna gudbinaya codsiga Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) si laguugu soo oggolaado.

Mar ay ahaataba, waxaa la arkaa inaad adigu qorato codsigaaga oo aad u dirsato la-taliyehaaga IRIS. Waxaa jira dhowr waxyaabood oo lagaa rabo inaad xusuusato markaad codsaneyso lacag dheeraad ah:

- Faahfaahi sababta ay sida aad sheeganeyso u tahay mid qiime ahaan macquul ah oo u fiican daryeelka baahidaada mustaqbalka fog.
- Mar kastoo ay macquul tahay, codsigaagu waa inuu ku jiraa saddex qiyaas oo kala ah qiime jaban ee waxa ama adeeg aad codsaneyso.
- Mashruucyada dibu-hagaajinta iyo dhismaha waa in ay waafaqaan habka iyo sharciyada dhismaha guriga.
- Waa inaad sugto oggolaansho ka hor intaadan soo dalban alaab, hawl, ama adeegyo wixii ku jira codsiga.

Qorsheyso inaad soo gudbiso kharashka aad u dhiibaneyso wakiilka xafiiska shaqaalaha. Sharciyada barnaamijkan waxaa shuruud u ah in jeegagga la dirayo in loo qoro dadka kuu shaqeeyey, si aan adiga lacag-celin laguugu sameyn.

### Bilaabidda Qorshahayga

Adigoo eegaya yoolalkaaga, waa inaad go'aansato waxyaabaha, taageerada iyo adeegyada kugu caawinaya inaad gaarto daryeelka muhiimka ah ee mustaqbalka fog. Iska hubso inaad ka fekerto siyaabo aad lacag la'aan ku heli karto waxyaabaha aad u baahan tahay. Marka aad go'aansato waxa kuugu muhiimsan, tixgeli waxyaabaha soo socda:

- Waxyaabo badan ama caawimaad bilaash ah inaad heli karto.
- Asxaabtaada iyo qoyska in ay ku caawin karaan, ama in ay garanayaan dad kale oo ku caawin kara. Intaas waxaa sii dheer, la-taliyehaaga IRIS in uu kugu xiri karo dad kale oo isticmaala IRIS oo laga yaabo in ay kaa beddeshaan ama kula wadaagaan shaqaale ama wax kale.
- Waa inaad ku darto waxyaabaha, taageerada ama adeegyada kuu hagaajin kara tayada noloshaada. Waxa kale oo kuu fiican inaad hubiso inaad wax kasta ku hesho qiime jaban.
- Qof kale oo ku jira barnaamijka IRIS ayaa laga yaabaa in uu raadinayo caawimaad la mid ah midda aad rabto. Haddii aad dooneyso inaad dadka la wadaagto macluumaad aad ka hayso waxyabo gaar ah, taageeero iyo adeegyo, u sheeg la-taliyehaaga oo la sii wadaagi kara dadkaas.
- La-taliyehaaga IRIS ayaa kuu haya waxyaabo kugu caawin kara in aad uga fekerto naqshadeynta qorshahaaga. Adiga ayaa go'aansanaya haddii aad isticmaaleyso waxaas iyo haddii aad rabto in aad caawimaad ka hesho la-taliyehaaga IRIS. Waxyaabahaas qorsheynta

ah shuruud ma aha balse waa caawimaad aad ku go'aansaneyso waxa muhiimka u ah qorshaha.

### Beddelaadda Qorshahaaga

Waxaad beddeli kartaa qorshaha si aad u waafajiso baahidaada. Taleefan ama boostada intarnetka kula soo xiriir la-taliyehaaga IRIS, ama la xiriir xafiiska la-taliyehaaga IRIS oo la socodsii qorshahaaga. Wixii aad ka beddesho qorshahaaga ma dhaqan galayo ilaa aad wixii cusub oggolaado uga soo hesho xafiiska la-taliyehaaga IRIS.

### Marka Taageero Degdeg ah Loo Baahan Yahay

Mararka qaarkood, xaaladaha iyo nolosha dadka waxay u baahan yihiin in si degdeg ah looga bilaabo barnaamijka IRIS. Tusaale, in xaq loo yeesho ceymiska Medicaid ayaa dadka qaar u bilaabata marka uu u bilowdo qorshaha IRIS. Haddii aad u baahan tahay waxyaabo, taageero ama adeegyo degdeg ah, la-taliyehaaga IRIS ayaa qorshee gaarsiis ah kugu caawinaya. Xafiiska la-taliyehaaga ayaa markaas hubinaya inaad u bilowdo sida u dhakhso badan ee macquulka ah. Wax baad beddeli kartaa qorshaha mar kasta markaad bilowdo IRIS ka dib.

OGSOONOW: *Haddii aad iska baddeleyso IRIS oo aad galeyso barnaamij kale, adeegyada kaama go'ayaan.*



## Waxayaabaha IRIS, Taageerada iyo Adeegyada kuu Diyaarsan

Intaas waxaa sii dheer adeegyada lacag la'aan iyo waxyaabo kale oo adeegyo ah oo kugu habboon, wax kale, taageerada iyo adeegyada aad doorato, waxyaabo kale, taageero iyo adeegyo ayaa noqon kara adeegyada IRIS ee soo socda: [4]

- Wax nolosha kugu caawiya
- Xarun ay dadka waaweyn aadaan
- Guri ay dadka waaweyn ku noolaadaan (1 ilaa 2 sariir)*; (3 ilaa 4 sariir)†
- Qalab aad dadka kula hadasho
- Tababarka iyo waxbarashada dadweynaha
- Macluumaadyo ah tala-helid iyo dabiibid
- Wayaabo iyo adeegyo gaar kugu ah*
- Tababaridda hawlahaaga nolol-maalmeedka*
- Adeeg maalmeed
- Cunto guriga la isugu keeno
- Guriga oo wax laga beddelo
- Caawimaadda guri-helidda
- Guri cusub degig
- Xafiisyada adeegga la-taliyaha IRIS
- Wakiillada adeegga shaqaalaha barnaamijka IRIS
- Daryeelka IRIS ee shakhsiga ah*
- Adeeg kalkaaliso*(wax kale oo aan ahayn MA Card ayaa bixiya)
- Habka jawaabidda shakhsiga ah ee xaaladaha degdegga ah
- Adeegyada ka horreeya xirfad-yeelashada
- Guryaha daryeelka dadka waaweyn (goob nolosha la isku caawiyo)
- Meel kale in loo guuro
- Nasasho*
- Qalab daaweyn gaar ah iyo alaab sahay ah
- Taageerid dullaal†
- Caawimaad shaqo-helid*
- Taageerid daryeel guriga ah*
- Gaadiid*
- Qorsheynta xirfad-barashada mustaqbalka

Fiiro Gaar ah

*Qof aad isu dhaxdeen, qaraabo, ama masuul kale ayaa waxyaabahaas kuu qaban kara.

†Waa arrin ka baxsan dadka go'aanka soo gaara.

[4]Lacagaha IRIS waxaa loo isticmaali karaa ka dib marka ceysmiyada kale, Medicare ama kaarkaaga Medicaid ForwardHealth Card marka aysan kaa bixineyn waxba, taageero ama addeg.

## Daryeelka IRIS ee Shakhsiga ah

Dadka ku jira IRIS ee xaqa u leh adeegyada daryeelka shaqkhsiga ah waxay daryeelka shakhsiga ah ka heli karaan xafiiska daryeelka shakhsiga ah ee Medicaid ama daryeelka IRIS ee shakhsiga ah. Adeegyada IRIS ayaa buuxinaya wixii ah daryeelka shakhsiga ah ee aad xaqa u yeelato oo waxaa laga bixinyaa miisaaniyadda IRIS ee ka baxsan tan bil kasta. Xafiiska daryeelka IRIS ee Shakhsiga ah ayaa kuu diyaarinaya codsiga dhakhtarka iyo kalkaalisada la soconeysa adeeggan. Waxaad dooran kartaa inaad adigu is debbarto ama aad daryeelka shakhsiga ah ka heshoxafiiska daryeelka shakhsiga ah ee Medicaid. Weydiiso la-taliyehaaga fursaddaas haddii aad rabto daryeelka shakhsiga ah ee naftaada.

### Waxyaabaha, Taageerada iyo Adeegyada AYSAN kaa Bixineyn IRIS

IRIS macnihiisu waa inaad adigu xukumeyso noloshaada. Si kasta oo ay ahaato, waxaa jira waxyaabo, taageero iyo adeegyo aan lagu bixin karin lacagaha IRIS, sida:

- Waxyaabo ama adeegyo ay bixinayaan ceymiskaaga caafimaadka, Medicaid ForwardHealth Card ama Medicare.
- Waxyaabo ama adeegyo ay masuul ka yihiin xafiisyo kale (sida adeegyada waxbarashada dadka ay da'doodu tahay ilaa iyo 21 jir iyo adeegyada xirfad-barashada ee ay bixiyaan Wisconsin Deparment of Vocational Rehabilitation (Waaxda Xirfad-barashada Baxnaaninta ah ee Wisconsin)).
- Meel aad ku xareysan tahay, kirada lgaa rabo, lacagta guriga iyo kharashaadka kale ee guriga.
- Waxyaabo tijaabo ah iyo/am dabiibid.[5]
- Waxyaabo, taageero iyo adeegyo aan toos ugu xirneyn yoolalkaaga mustaqbalka ama baahidaada ama waxyaabaha aan qasdigoodu yahay manaafacaad dad kale.

### Dhammeystiridda Qorshehaaga
### Sida La-taliyehaaga IRIS Kuu Caawin Karo

Adiga keligaa ama iyadoo dad ku caawinay ayaad sameysan kartaa qrshehaaga. La-taliyehaaga ama la-taliyaha xafiiska IRIS ayaa kugu caawinaya wax kasta oo aad codsaneyso. Qorsheyaasha oo dhan waa la eegayaa si loo hubiyo in ay ku habboon yihiin heerarka barnaamijka IRIS. Haddii qorshehaagu heerarkaas gaari waayo, la-taliyehaaga xafiiska IRIS ama la-taliyehaaga ayaa kula soo xiriiraya si lagaala hadlo fursadahaaga.

Marka la eego oo la oggolaado qorsheha, waxaa laguu soo dirayaa waraaq laguugu sheegayo taariikhda uu IRIS kuu bilaabanayo. Koobbiga waraaqdaas waxaa loo dirayaa dadka kale ee ay tahay in lala socodsiiyo in uu kuu bilowday IRIS.

[5] La-taliyehaaga IRIS ayaa kugu caawinaya inaad g'aansato waxyaabaha, taageerada iyo adeegyada tijaabada ah.

## Jadwalka IRIS

Fadlan u tixraac jadwaka hoose habraaca tusmada qorshaha iyo wakhtiyada ku xiran tallaabo kasta.

| Waxa Dhacaya | Goorta ay Dhacayaan |
|---|---|
| Adiga ayaa xafiiska la-taliyehaaga IRIS (ICA) ka dooranaya Xarunta Macluumaadka Waayeelnimada iyo Naafannimada | Taariikhda lagu soo gudbiyey |
| Dadka aad xiriirto ICA ayaa ku soo dhaweynaya | 3 maalmood gudahood marka laguu soo gudbiyo |
| Waxaad dooran kartaa la-taliye ama mid ayaa lagugu qorayaa maalinta afaraad | 3 ilaa 4 maalmood gudahood marka lagu soo dhaweeyo ka dib |
| La-taliyehaaga ayaa kuugu imaanaya booqashada koowaad | 14 maalmood gudahood marka laguu soo gudbiyo |
| Adiga iyo la-taliyehaaga ayaa kuu sameyn doona qorshaha IRIS kuuguna gudbin doona oggolaanshaha ICA | 30 maalmood gudahood booqashada koowaad ka dib |
| Waa inaad doorato wakiilka xafiiska shaqada ee IRIS | 30 maalmood gudahood booqashada koowaad ka dib |
| Qorshehaaga IRIS waa la eegayaa, la oggolaanayaa lana fulinayaa; taariikhda bilowga IRIS ayaa bilaabaneysa | 45 maalmood gudahood laga soo bilaabo booqashada koowaad |
| Waad ku qoran tahay IRIS oo qorshehaagu waa shaqeynayaa | |

### ARRIN MUHIIM AH: Qorshaha Inuu Kuu Shaqeeyo

Waxaad bilaabi kartaa in aad habeysato adeegyo, taageerid iyo waxa ku qoran qorsheha inay eegaan xafiiska la-taliyaha IRIS. Si kasta oo ay ahaataba, ma bilaabi kartid inaad hesho adeegyada ay maalgeliyaan IRIS ilaa ay eegiddu kuu dhammaato, qorshaha in la oggolaaday oo uu shaqeynaayo, iyo in adeeggii la yeelay. Arrintan shaqaalaha aad qoroto oo dhan ayey khuseysaa, in kasta oo aysan shaqo kuu bilaabi karin ilaa ay soo buuxiyaan waraaqaha laga rabo iyo caddeynta in aysan danbi weyn oo hore soo gelin. Shaqaalaha waa in aysan shaqeyn wax ka badan 40 saac toddobaad kasta iyadoon marka hore loo oggolaan, oo waraaqaha saacadaha sixiixan lagama badan karo sida ku cad qorshaha IRIS.

## Helidda Shaqaalaha

Waxaa jirta dhowr siyaabood oo lagu helo shaqaale kuu sameeya adeegyada, sida caawinta daryeelka guriga, nasashada, kuwa shaqo-helid ama daryeelka shakhsiga ah. Waxaad leedahay xuquuq kala duwan iyo waajibaad ku xiran waxa aad doorato. Waxaa noqon kartaa:

- Shaqa-bixiye dad si toos ah u shaqaaleeya (wakiilka xafiiska yaa kuu noqonaya wakiil shaqa-bixiye oo shaqaalahana siinaya saacadaha ay shaqeeyaan markay soo gudbiyaan). Shaqaalahaas waxaa loo yaqaan "kuwa ay dadku soo qortaan."
- Maareynta shaqaalaha aad doorato o ay kugu caawin karaan xafiiska aad adigu doorato.
- Inaad talo ka dhiibato shaqaalaha la qorayo oo ay kula maamulaan xafiis kuu keena.
- Inaad isticmaasho xafiiska si ay kuugu sameeyaan adeegyada aad uga baahan tahay iyagoo soo diraya shaqaale u jooga.

## Fursadaha Helidda Shaqaale ama Caawiyeyaal

| Xafiiska aan lacag kaaga qaadaneyn adeegyada | Talo ayaad ka dhiibaneysaa shaqaalaha | Adigaa maamulaya shaqaalaha | Adigaa ah shaqa-bixiyaha |
|---|---|---|---|
| Xafiiska ayaa shaqaalaha keenaya, qoraya kuuna maamulaya.<br><br>Wakiilkaaga shaqaalaha ee IRIS ayaa bixinaya caddeynta lacagaha. | Shaqaalaha aad ku taliso ayey xafiis kuu shaqaaleynayaan kuuna maareynaya oo adigaa dooranaya xafiiska. Wakiilkaaga shaqaalaha ee IRIS ayaa bixinaya caddeynta lacaha. | Shaqaalaha aad adigu doorato ayey xafiiska aad rabto kuu qorayaan.<br><br>Wakiilkaaga shaqaalaha ee IRIS ayaa bixinaya caddeynta lacaha. | Adigaa gaaraya go'aanka shaqa-bixinta. Wakiilkaaga shaqaalaha ee IRIS ayaa wakiil kuu ah oo kuu qabeynaya hawlaha mshaar-bixinta. |

## Waxyaabaha la Tixgeliyo Markaad Shaqaale Qoraneyso

Inaad ka jawaabto su'aalaha soo socda ayaa ku caawin kara in aad go'aansato waxaad ka rabto shaqaalaha aad qorato:

- Miyaan u baahanahay hal shaqaale ka badan oo i caawin doona?
- Immisa jeer ayaan caawimaad u baahanahay? Shaqa-buuxda mide shaqo saacado ah?
- Wakhtigee iyo maalmahee ayaan toddobaad kasta caawimaad rabaa?
- Wakhtiga shaqaalaha miyaa la beddeli karaa?
- Saacaddii meeqa ayaan siinayaa shaqaalaha?
- Lacagteydu ma oggolaan kartaa manaafacaadka shaqaalaha?
- Maxaan uga baahnahay shaqaalaha inay sameeyaan? Sidee baan rabaa in loo sameeyo shaqada?
- Shaqaalaha ma uga baahnahay in ay meelo ii kaxeeyaan?
- Sidee baan u bari karaa shaqaalaha wax ay iiga baahdaan?
- Ma waxaan rabaa qof xirfad gaar ah ama waaya-aragnimo leh?
- Miyey shaqaaluhu u baahan yihiin in ay wax culus illaa xad qaadi karaan?
- Ma waxaan u baahnahay shaqaale kala duwan oo igu caawiya waxyaabo kala duwan?
- Ma waxaan rabaa shaqaale ah saaxiib, deris, ama qof qoyska ah?
- Ma qofka aan garanayo ee raba in uu i caawiyo ayaa ah shaqaalaha iigu fiican?
- Sida aan ugu qorayo jadwalka shaqaalaha waa inaysan ka badan 40 saacadood toddobaadkiiba iyadoon marka hore loo oggolaan?

## Sameynta Masuuliyadda Shaqada

Qoraal ah faahfaahin buuxda ayaa igu caawinaya inaysan igu dhicin inaan shaqaalaha is fahmi weyno. Waxaa sida adiga oo kale muhiim shaqaalaha u ah waa in aad caddeyso shaqada laguu qabanayo. Soo raaci faahfaahin badan, sida mid kooban qeybaha shaqada wakhtiyada aad rabto in la sameeyo.

### Helidda Shaqaale Fiican

Marka aad ogtahay waxa aad ka rabto qof shaqaale ah, waa inaad hesho qofka kuugu fiican shaqada. La-taliyehaaga IRIS ayaa kugu caawinaya. Meelaha fiican ee laga helo shaqaalaha waa:

- Dadka aad garaneyso, sida qoyska iyo asxaabta
- Ururrada deegaanka ee u adeega waayeelka ama dadka naafad ah
- Goobaha cibaadada, sida masjid aad ku xiran tahay
- Goobaha waxbarasha kuleejka
- Xafiiska shaqaalaha iyo adeegayada shaqada
- Wargeysyada magaalada
- Boorarka lgu quro ogeysiisyada ee dhismeyaasha dhexdooda
- Macluumaadyada intarnetka

Waxaad sameynsan kartaa xayeysiis aad ku qorato intarnetka ama wargeyska qeybtiisa ah caawimaad ayaa loo baahan yahay. Tixgeli siyaabaha kala diwan oo dhan ee aad ku heli karto qof kuu shaqeyn kara. Go'aanso haddii aad u baahan tahay lacag inaad geliso xayeysiis. Waxaad isticmaali kartaa lacagta IRIS si aad ugu bixiso xayeysiiska.

Waxyaabahaad ku dareyso xayeysiiska ah baahida caawimaadda:

- Saacadaha aad rabto in uu qof kuu shaqeeyo
- Faahfaahin guud oo ah waxa shaqaaluhu qabanayo
- Tilmaamaha lagu soo codsanayo shaqada

Ha qorin macluumaad ka badan inta muhiimka ah. Tusaale, ha qorin cinwaankaaga ama in aad keligaa nooshahay. Waxaa fikrad fiican ah in aad qof kasta weydiiso in la soo buuxiyo codsi qoraal ah. IRIS ayaa kuu haysa tusaale ah codsiga iyo faahfaahinta shaqada.

Codsiga shaqada waa in ay ku jiraan macluumaadka codsadaha:

- Magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka
- Tababarka ama waxbarashada qofka
- Aqoonta iyo waaya-aragnimada shaqada
- Raadraacyo
- Oggolaansho aad ku soo hubineyso raadraacyada
- Xaqiiinta sheegidda runta
- Saxiix



## Wareysiga Dadka Shaqada Soo Codsada

Waxaad u baahan kartaa inaad taleefanka ku wareysato dadka ka hor inta aadan toos ula kulmin si aad wareysi caadi ah ula yeelato. Iska hubso inaad weydiiso su'aalo ku saabsan shaqooyinkii hore ee qofka, haddii qofku awoodo inuu sameeyo hawlaha shaqada u gaarka ah, iyo shaqada sida loo qabanayo.

Mid ka mid ah waxyaabaha aad go'aansaneyso waa qofka aad la yeelaneyso wareysiga fool-ka-foolka ah iyo inaad ballan u dhigto. Haddii aadan dooneyn inaad wareysiga ku sameyso gurigaaga, go'aanso meel kale oo aad qofka kula kulanto. Ha kula kulmin goobaha dadweynaha, sida maktabad, biibito ama makhaayad. Waxa kale oo kula joogi kara asxaab markaad wareysiga qaadeyso.

Wareysiga waa inaad ku darto mowduucyo aasaasi ah:

- U sheeg codsadaha shaqad iyo waxa aad rabto in laguu sameeyo, oo waa in aad siiso warqadda faahfaahinta shaqada.
- U sii sheeg haddii ay guriga kuu joogaan xayawaan rabbaayad ah.
- Weydii su'aalo furan oo ha weydiin su'aalo ay uga jawaabi karaan haa ama maya.
- Ka hadal marka aad rabto in shaqada laguu bilaabo.

- Kala hadal shuruudaha waraaqaha saacadaha iyo sida uu kuula shaqeynayo qofka kuu ah wakiilka xafiiska shaqada, mushaar-bixinta, canshuurta mushaarka iyo lacagaha la iska gooyo.
- Kala hadal lacagta saacaddii la qaato iyo manaafacaadka kale iyo sida lacagta la isugu kordhiyo.
- Waa in qof kasta uu su'aalo ku weydiiyo.
- U sheeg in ay qof kasta shuruud ku tahay baarista danbiyadii hore.

- Haddii aysan dadku keenin raadraacyo dad lagala xiriiro, weydii codsade kasta liiska magacyada raadraaca u ah iyo sida loola xiriiri karo goobihii ay horay uga soo shaqeeyeen.
- Iska xaqiiji in codsaduhu fahmayo in aad tahay shaqa-bixiye, oo aadan ahayn IRIS, la-taliyaha IRIS, xafiiska la-taliyaha IRIS, ama wakiilka xafiiska shaqaalaha.

Su'aalaha ka mid ah kuwa aad wareysiga u isticmaaleyso:

- Maxay tahay waaya-aragnimada aad haysato?
- Maxaad shaqadan ka filaneysaa?
- Maxaa kugu dhiirrigelin kara in aad shaqadaada si fiican u qabato?
- Waa maxay xirfadaha aad leedahay ee kugu caawin kara shaqada?

Ha hilmaamin in aad dadka uga mahadceliso wakhtigooda. U sheeg goorta aad go'aan gaareyso iyo sida aad go'aankaaga qofkaas u ogeysiin doonto.

**TALO MUHIIM AH** – Su'aalaha qaarkood ee aan dadka marna **LAGU** weydiin wareysiga:

- Waa immisa da'doodu?
- Culeyskaagu waa meeqa?
- Xaas miyaad tahay ama ma leedahay lammaane?
- Carruur miyaa kuu jooga? Carruur badan inaad hesho miyaad jeceshahay?
- Ma jiraa qof aad shukaansato?
- Weligaa mushaarkaaga ma lagaaga gooyey amar maxkamadeed?
- Naafo miyaad tahay?
- Intee jeer ayaad aalkolada cabtaa?
- Diintaadu waa tee, isirka ama qowmiyadda, arrimaha siyaasadda?

## Soo-hubinta Raadraacyada

Soo-hubinta goobaha shaqooyinkii hore raadraacyadooda ayaa fikrad kaa siin kara sida uu noqon karo codsadaha aad la dhacdo. Si aad u hubiso raadraacyada, tixraacyada qoran oo dhan la hadal oo wax ka weydii shaqadii codsadaha.

Su'aalaha fiican waxaa ka mid ah:

- Sida ay tahay aqoonta ay u leeyihiin codsadaha?
- Nooca shaqada uu codsaduhu u qaban jirey?
- Waa maxay waxyaabaha uu ku fiican yahay codsaduhu?
- Waa maxay waxyaabaha uusan ku fiican codsaduhu?
- Haddii ay mar kale shaqa siin lahaayeen codsadaha? Sababta ay u siinayaan ama ugu diidayaan?
- Codsadaha shaqada wakhtigeeda ma ku imaan jireen?
- Codsadaha shaqada si joogta ah ma u imaan jireen?
- Codsadaha ma soo hadli jirey marka uu soo daahayo ama uusan shaqeyn karin?
- Codsaduhu shaqada ma keeni jirey mushkiladaha shakhsiga ah?

- Haddii aad siineyso buundo ah 1 ilaa 10, sidee buu codsaduhu u qaban jirey shaqada laga rabay? Weydii in laguu sharxo heerka xilka shaqada.
- Weydii su'aalo la xiriira tayada aad ka rabto shaqaalaha. Tusaale, codsaduhu ma yahay qof daacad ah? Codsaduhu ma ixtiraamaa dadka kale?



### Dhammeystirka Daryeelaha iyo Soo-hubinta Danbiyadii Hore

Wakiilka xafiiska shaqada ee IRIS ayaa dhammeystiraya soo-hubinta danbiyadii hore ee shaqaalaha aad rabto. La-taliyehaaga ayaa kugu caawinaya dhammeystirka waraaqaha muhiimka ah iyadoo lagaa hubinayo in loo sii diry wakiilka xafiiska shaqada si ay uga sii shaqeeyaan.

Danbiyada daran waa in shaqada loogu diido codsadaha si uusan qofkaas kuugu shaqeyn oo uusan mushaar ka qaadan lacagta IRIS. Mushaar shaqaale lagama bixin karo lacagta IRIS ilaa la soo baaro oo loo dhammeystiro wax kasta.

### Kama-dambeys Bixinta Shaqada

Adigoo tixgelinaya codsade kasta wixii aad ka baratay, waa inaad gaarto go'aanka qofka kuu noqon kara shaqaalaha saxda ah. Haddii aad go'aansato qofka aad shaqaaleyneyso, taleefan kula xiriir oo qofkaas u sheeg in aad u dooratay shaqada. Mar kale u sheeg mushaarka. Haddii qofku shaqada aqbalo, go'aanso wakhtiga uu bilaabayo.

Dadka kale ee aan kuu shaqeyn doonin u sheeg inaad qof dooratay. Uma baahnid inaad u sheegto sababta aad u dooran weyday. Keliya u sheeg in aad dooratay qof ay kuu fiican tahay aqoontiisa iyo xirfadihiisa. Waxaad sii ogeysiisaa in aad waraaqda jawaabta u soo diri doonto. Iska hubso in codsaduhu aqbalo shaqada ka hor inta aadan codsadeyaasha kale la xiriirin.

Sida ugu dhakhso badan ee go'aankaaga shaqaaleynta, qofka aad dooratay ha u soo dhammeystiro waraaqaha shaqaaleynta ee ay kuu dhiibaan xafiiska la-taliyaha IRIS:

- Foomka I-9 oo ah in qofka dalkan ka shaqeysan karo
- Heshiiska lacagta saacaddii

- Foomka W-4 oo ah canshuurta mushaarka ee la iska qaadayo
- Heshiiska lagula shaqeynayo Medicaid


Foomamkaas buuxsan u dir, adigoo raacinaya koobbiga kaarkaaga Sagaalka Lambar, wakiilkaaga xafiiska shaqaalaha ee IRIS. La-taliyaha ayaa kugu caawinaya buuxinta iyo dirista foomamkaas haddii aad caawimaad uga baahato.

### Manaafacaadka Kale ee Shaqaalahaaga

Waxaad lacagtaada IRIS u isticmaali kartaa inaad ku bixiso fasaxa nasashada ah ee shaqaaluhu qaato sannadkiiba mar. Ceymiska Magdhowga Shaqaalaha ayaa masuul ka ah shaqaalaha ku dhaawacma shaqada oo waa wax ka baxsan lacagta IRIS. Wakiilkaaga xafiiska shaqada ee IRIS ayaa macluumaad badan kaa siin kara arrinta manaafacaadka shaqaalaha iyo sida aad u fahamto una maareyso.

## Go'aanka haddii Qorshahaagu kuu Shaqeynayo

Adiga ayaa ah qofka ugu fiican ee go'aan ka gaari kara haddii uu qorshaha IRIS kuu shaqeynayo ama haddii aad wax ka baddeleyso. Waxaad tixgelin kartaa su'aalaha soo socda:



- Ma u dhawahay inaan gaaro yoolalkaaga?
- Ma ka shaqeeyaa shaqada aan rabo, saacadaheeda iyo lacagteeda?
- Bulshada ma ka warhayaa intii aan rabo?
- Wakhti miyaan geliyaa sameynta waxyaabaha aan jeclahay?
- Wakhti miyaan geliyaa dadka aan jeclahay?
- Miyey shaqaaluhu iigu shaqeeyaan sida aan ka rabo ee shaqada?
- Sidee buu qorshahaygu u hagaajin karaa nolosheyda?

## Dibu-eegista Sannadka

Si aad xaq ugu yeelato IRIS waa wax la xaqiijinayo sannad kasta. Xaqiijinta waxaa ka mid ah:

- Inaad xaq u leedahay dhaqaalaha badan ee kaarka Medicaid, oo waa arrin ay sameeyaan xafiiska deegaanka ama kawntiga.
- Baahidaada caddeynta kaarka Medicaid. Xafiiska la-taliyehaaga IRIS ayaa goor hore ku soo ogeysiin doona taariikhda ballanka dibu-eegista baarista wax-qabsigaaga ee daryeelka mustaqbalka fog, taasina waa caddeyn u ah in aad wax-qabsiga awgiis xaq u sii yeelato Medicaid.
- Kulankaaga la-taliyeha IRIS si aad ugala hadasho qorshaha IRIS.

## Badqabidda iyo Caafimaadka

IRIS waa barnaamij dowladeed oo ay dad yar geli karaan, waana in uu u fiican yahay caafimaadka iyo badqabidda dadka ku jira IRIS. Dadka ku jira IRIS ayaa masuul ka ah in ay soo sheegaan wixii dhib ah oo ay ogyihiin ama ay uga shakiyaan in ay khatar ku yihiin.

Waxyaabaha soo socda waa tusaaleyaal dhibaatooyin ay sameyn karaan dadku, sida qoyska, asxaabta, dadka ku daryeela, dadka kuu adeegaya, ama dad kale oo bulshada ka mid ah:



- Tacaddi ama dayac
- Faldanbiyeed
- Dhimasho
- Dhicid ama dhaawacmid
- Isbitaal in la isa seexiyo
- Xaalad caafimaad ama daawo oo degdeg ah
- Khaladaad daawo
- Lacag in la lunsado
- Burburinta alaab

Haddii aad ogtahay ama aad ka shakiso waxyaabo noocaas ah oo dhacay, sida ugu dhakhso badan ula xiriir xafiiska la-taliyehaaga 24 saac gudahood. Xataa haddii ay ka soo wareego wakhti badan, waa in aad soo sheegto.

Haddii adiga ama qof kale aad garaneyso la idinku sameeyo tacaddi ama dayac, si aad arrintaas u sheegto taleefan kula xiriir booliska xaafaddaada ama xafiiska maamulka deegaanka dadka waaweyn. Intaas waxaa sii dheer, arrin kasta oo xun oo dhacda u sheeg xafiiska la-taliyehaaga IRIS.

## Waajibaadka kaa saaran IRIS

Waxaa jira waajibaad muhiim ah oo lagaa rabo si aad guul ugu gaarto barnaamijka IRIS. Waa lagugu caawinayaa si aad uga soo baxdo waajibaadkaaga. Waajibaadkaaga waxaa ka mid ah:

- Inaad ka qeybqaadato wacyigelinta IRIS.
- Inaad wada-shaqeyn la yeelato la-taliyeha IRIS ee aad doorato iyo inaad ogeysiiso caawimaadda aad uga baahato.
- Sameynta qorshaha IRIS ee ah yoolalkaaga mustaqbalka fog.
- Qorista gebi ahaan waxa aad ku bixineyso IRIS, hawl taageero ah iyo adeegyada qorshahaaga.
- Ku dedaalkidda waxa laguu qabanayo, taageerada iyo adeegga aad u baahan tahay iyo qorista waxyaabaha laguu qabtay.
- Sameysiga qorshaha xaaladaha degdegga ah.

- Waa inaad macluumaadka siiso wakiilka xafiiska shaqaalaha si lacagtooda loo siiyo dadka iyo shirkadaha kuu adeega, ku taageera ama hawl kale kuu qabto.
- Xafiiska la-taliyaha IRIS inaad u soo sheegto wixii khatar kugu ah. Xafiiska la-taliyaha IRIS u soo sheeg markaad gasho isbitaal, guryaha dadka waaweyn ama meel kale oo dadka lagu hayo.
- Inaad barnaamijka IRIS kala shaqeyso sida aad xaq ugu yeelaneyso, sida caddeymaha xaq inaad u leedahay Medicaid.
- Bixinta lacag yar oo ah xaqal-jeebka Medicaid haddii lagaa rabo (hoos ka eego).
- Hubinta in shaqaaluhu buuxiyaan Heshiisyada Adeegga iyo Shaqadooda Medicaid.
- In ay IRIS kaa helaan macluumaadka ay kaaga baahan yihiin ee ah sida aad xaq ugu yeelaneyso iyo daryeelkaaga mustaqbalka fog.

## Waajibaadkaaga Shaqa-bixiye Markaad Qoroto Shaqaalahaaga

- Akhrinta waraaqaha shaqa-bixiyaha ee aad ka hesho la-taliyaha
- Akhrinta waraaqaha shaqa-bixiyaha inaad la sameyso shaqaalaha
- Hubinta lacagta shaqaalaha, fasaxyada iyo manaafacaadka kale oo dhan sida ku qoran barnaamijka
- Buuxinta waraaqahaaga shaqa-bixiye ahaan iyo kuwa bilaabidda shaqada inaad u dirto wakiilka xafiiska shaqada ee la-taliyehaaga IRIS ka hor intaysan shaqaaluhu wax shaqo ah kuu bilaabin (la-taliyaha ayaa kugu caawinaya buuxinta waraaqahaas)
- Maareynta iyo maamulidda shaqaalaha
- Sidaan u qorayo jadwalka shaqaalaha si aysan uga ka badan 40 saacadood toddobaad kasta iyadoon marka hore loo oggolaan?
- Buuxinta iyo oggolaanshaha waraaqaha saacadaha shaqada iyo in loo gudbiyo wakiilka shaqaalaha IRIS marka kama dambeysta ah ee la diyaarinayo lacagta mushaarka
- Wakhtiga waraaqaha saacadaha shaqada la shaqeeyey in lagu oggolaado in aysan ka badan saacadaha loogu oggol yahay ee qorshaha IRIS
- Oggolaanshaha lacagta adeegyada sida qoran ee loo oggol yahay.

## Lacagtaad Medicaid Qeybtaad Bil Kasta Bixineyso

Haddii sidaad xaq ugu yeelaneyso Medicaid ay shuruud u tahay lacagta aad bixineyso bil kasta qeybtaada, waxay noqoneysaa waajibkaaga in aad bxiso qeybtaas bil kasta si aad xaq ugu sii yeelato Medicaid iyo IRIS. Xafiiska la socda dakhliga dadweynaha ee degmadaada ayaa kugu wargelin doona haddii lagaa rabo inaad bil kasta lacag bixineyso. Qofkii bixin waaya lacagta qeybta laga rabo waxaa khtar galeysa in uu xaq u yeesho Medicaid iyo IRIS. Lacagaha qeybta la iska rabo waa bil kasta bilowgeeda oo waa in loo diro wakiilka xafiiska shaqada ee IRIS.

Lacagta waa in lagu qoro IRIS, loona diro wakiilka aad la xiriirto ee xafiiska shaqaalaha IRIS. Haddii aad su'aalo ka qabto bixinta lacagta lagaa rabo, fadlan soo garaac taleefanka IRIS oo ah 1-888-515-4747.

## Soo-diridda Cabasho iyo Dacwo

Haddii aad cabasho ama dacwo ka qabto IRIS ugu horreyn la xiriir la-taliyehaaga IRIS ama xafiiska la-taliyeha IRIS. Waxa kale oo aad soo garaaci kartaa taleefanka lacag la'aanta ah ee 1-888-203-8338 oo weydiiso wakiilka barnaamijka, ama DHS IRIS Grievances farriin ugu soo dir DHSIRISGrievances@wisconsin.gov.

Waxaad caawimaad ka heli kartaa wakiil gaar ah (ombudsman), oo ah qof kugu caawinaya baarista iyo xallinta arrimaha la xiriira IRIS. Waxaa jira laba wakiillo gaar ah oo da'da ayey ku xiran yihiin.

Haddii da'daad u tahay 18 ilaa 59, wakiilka gaarka ee IRIS waxaad ku heleysaa ururka Xuquuqaha Naafada ee Disability Rights Wisconsin oo leh saddex xafiis goboleed:

Madison
**Disability Rights Wisconsin**
1502 West Broadway, Suite 201
Madison, WI 53713
608-267-0214
TTY: 888-758-6049
Fax: 833-635-1968
Laynka Bilaashka ah: 800-928-8778

Milwaukee
**Disability Rights Wisconsin**
6737 W. Washington Street, Suite 3230
Milwaukee, WI 53214
414-773-4646
TTY: 888-758-6049
Fax: 833-635-1968
Toll Free: 800-708-3034

Rice Lake
**Disability Rights Wisconsin**
217 W. Knapp Street
Rice Lake, WI 54868
715-736-1232
TTY: 888-758-6049
Fax: 833-635-1968
Toll Free: 877-338-3724

Haddii ay da'daadu tahay 60 jir ama ka weyn, wakiilkaaga gaarka ah ee IRIS wuxuu Board on Aging and Long-Term Care (Guddiga Waayeelka iyo Daryeelka Dheer), oo xafiiskoodu ku yaallo gobolka oo dhan, sida:

**Wisconsin Board on Aging and Long Term Care**
Taleefan Bilaash Lagu Soo Garaaco: 1-800-815-0015

Cabashooyinka iyo dacwadaha aan xal lala gaarin xafiiska la-taliyaha IRIS, wakiilka xafiiska la-taliyaha IRIS, ama wakiilka gaarka ah ayaa kuu gudbin kara Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee Wisconsin):

DEPARTMENT OF HEALTH SERVICES
P.O. Box 7851
1 W. Wilson Street, Room 665
Madison, WI 53707-7851
608-266-1865
TTY: 888-701-1251
Email: DHSIRIS@wisconsin.gov
Barta intarnetka: https://www.dhs.wisconsin.gov/iris/index.htm

## Beddelashada lagu doorto Xafiis Wakiil Shaqaale oo Cusub oo ah La-taliyaha IRIS ama Ka-bixidda Barnaamijka IRIS

Waxaad dooran kartaa inaad u beddelato xafiis la-taliye IRIS oo kale oo magaalada ku yaalla markii aad rabto. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Macluumaadka Waayeelka iyo Naafada si ay kuugu sameeyaan beddelka.

Haddii aad rabto inaad u beddelato wakiil xafiis shaqo oo cusub, la xiriir la-taliyahaaga IRIS oo kugu caawin kara beddelkaas.

Barnaaminjka IRIS markii aad rabto ayaad ka bixi kartaa. Waxaa muhiim ah in aad barnaamijka u sheegto markaad ka baxeyso. Fadlan u sheeg xafiiska la-taliyeha IRIS in ay kugu caawiyaan beddelka. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Macluumaadka Waayeelka iyo Naafada. Markii aad rabto ayaad ku soo noqoneysaa IRIS haddii aad weli xaq u leedahay oo aad waajibaadkooda ka soo baxdo.

## Jawaabaha Su'aalahaaga ama Macluumaad Dheeraad ah

La xiriir IRIS haddii aad rabto caawimaad dheeraad ah.

Xafiiska Xiriirka ee IRIS Call Center
Farrimo iyo TTY: 1-888-515-IRIS (4747)
Boostada Intarnetka: info@Wisconsin-IRIS.com
Barta intarnetka: https://www.dhs.wisconsin.gov/iris/index.htm



# EREY-BIXINTA QORAALKA

## Barnaamijka IRIS – INCLUDE, RESPECT, I SELF-DIRECT

Barnaamijkan oo ka jira Wisconsin macnihiisu waa taageerada shakhsiga ah oo ay dadku naftooda wax ugu qabanayaan mustaqbalka fog waxyaabo ay naftooda ku maareyn karaan, taageero iyo addegyo ay ku radsadaan lacagta loo oggol yahay ee barnaamijka IRIS. Lacagaha IRIS waxaa lagu iibsan karaa alaabo, wax taageero kuu ah io adeegyada u fiican danahaaga mustaqbalka fog, oo waxyaabaha aadnan ka heli karin qoyska iyo asxaabta. IRIS waa lacag dadka loogu caawiyo waa maareynta nolosha mustaqbalka fog.

## MIISAANIYADDA IRIS

Lacagta loo baahan yahay ee lagu bixiyo adeegyo socda oo ka baxsan hal mar ama waxyaabo qaali ah. Miisaaniyadda waxaa loo eegaa baahida qof kasta oo waa la kordhiyaa. Qiyaasta caddadka miisaaniyada waa laguu sheegayaa ka hor intaadan isku qorin IRIS. Ka dib markaad qorshe sameysato, miisaaniyadda waa in lagu bixiyo adeegyada ay soo oggolaadaan IRIS ee ku qoran qorshaha adeegyada.

## LA-TALIYE/LA-TALIYAHA IRIS

Qof la tababaray oo deegaankaaga ka soo jeeda ayaa kugu caawin doona fahmidda shuruudaha IRIS, kuguna caawinaya sameysiga iyo fulinta qorshaha adeegga iyo hawlaha kale, iyadoo lagugu caawinayo.

## XAFIISKA LA-TALIYAHA IRIS

Xafiis kula shaqeynaya, oo ay soo aqoonsatay Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) ee ka shaqeysa hawlaha maalin kasta ee IRIS; tababar ayaa la siiyaa, waxay maamulaan oo caawiyaan la-taliyeyaasha IRIS; waxay eegaan qorsheyaasha caawinta iyo adeegga; waxay kaaga jawaabayaan su'aalaha aad weydiiisaan adiga, qoyska iyo shaqaalaha. Adiga ayaa xafiiska la-taliyehaaga IRIS ka dooranaya Xarunta Macluumaadka Waayeelka iyo Naafada ee deegaankaaga.

## WAKIILKA XAFIISKA SHAQAALAHA IRIS

Xafiiska waxa uu qandaraas kula jiraa oo aqoonsi ka haystaa Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) maamulkeeda bixinaya mushaarka shaqaalaha adiga kuu adeega, waxay kaa soo qaadayaan lacag qeyb yar ah haddii ay jirto, waxay diyaariyaan warbixinta kharashka baxa, waxayna kugu caawinayaan in aad la socoto kharashka kaa baxa ee lacagta IRIS. La-taliyehaaga IRIS ayaa kugu caawinaya inaad doorato wakiilka xafiiska shaqaalaha.

## DADKA KU JIRA IRIS

Qofka ku jira barnaamijka IRIS, sida dadka shuruud ahaan xaqa ugu yeesha ee ah waayeelka jilicsan ee qaba naafannimo jir ahaaneed ama mid ahaaneed ee Wisconsin. Barnaamijka IRIS ee aad ku jirto, oo aad rabto inaad adigu maamulato daryeelkaaga taageeridda iyo adeegyada ee mustaqbalka fog.

## DARYEELKA SHAKHSIGA AH EE IS-MAAMULIDDA IRIS

Dadka ku jira IRIS ee xaqa u leh Medicaid daryeelka shaqkhsiga ah iyagoo naftooda maamulaya ama in ay adeeggan xafiis kale hoos tagaan.

## QORSHAHA ADEEGGA IYO TAAGEERADA IRIS

Qorshe qoran oo aad sameysato, keliga ama adigoo lagu caawiyey, oo ay ku jiraan waxyaabaha, taageerada iyo adeegyada aad rabto inaad ku gaarto baahida yoolalka mustaqbalka fog; qiimaha adeegyada; inta jeer ee laguu qabto hawshaas iyo xirefadleyaasha hawsha kuu qabta. Waxyaabaha iyo taageerada aan la bixin, iyo sidoo kale lacagta aan la bixin ee adeegyada laguu qabto ee Medicaid, ee kuugu qoran qorshaha. Qorshahaaga waxa kale oo ku jira waxyaabo, taageerid iyo adeegyo aad ku heleysid lacag la'aan.

## MEDICAID

Waxa kale oo la yiraahdaa Title XIX, Title 19 iyo MA, waa barnaamij ay maalgeliyaan gobolka iyo dowladda dhexe, oo waxaa loogu tala galay in dadka xaqa u yeesha arrimaha caafimaadka, taageeo kale iyo adeegyo.

## GO'AAN-SHAKHSIYEED

Fikrad guud oo macnaheedu yahay in aad adigu noloshaada xukunto oo aad tahay qof bulshada qiimo ku leh. Go'aan-sameysiga wuxuu ku saleysan yahay shan mabda' oo aasaasi ah:

1. **Xornimo** inaad xor u tahay go'aanka sida aad rabto inaad u noolaato
2. **Xukumid** inaad xukunto miisaaniyadda lacag gaar ah
3. **Taageerid** inaad adigu sida sax ah u sameysato wixii taageero uu ah
4. **Masuuliyad** inaad si macquul ah u istimaasho lacagta dowladda
5. **Xaqiijin** ah hoggaamin muhiim ah oo aad naftaada ugu hadleyso

## WISCONSIN DEPARTMENT OF HEALTH SERVICES (WAAXDA ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE WISCONSIN)

Waaxda Wisconsin ee bixisa dhaqaalaha IRIS. Xarumaha Dowladda Dhexe ee Adeegyada Medicaid iyo Medicare ayaa oggolaaday IRIS oo ay u raaceen Weybta 1915(c) ee Sharciga Ceymiska Dadweynaha.

## QORAALLADA AKHRISTAHA

## Wixii Macluumaad Dheeraad ah oo ku saabsan IRIS:

Barta Intarnetka ee Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) ee Wisconsin

https://www.dhs.wisconsin.gov/iris/index.htm

Siyaabaha Loola Soo Xiriirayo IRIS:

Soo garaac: 1-888-515-IRIS (4747)

Boostada Intarnetka (Email): iris@wpsic.com